



ma kuu diraa wuxuu Rasuulka Ilaahay scw ii diray? inaadan dhaafin sanam oo aad burburiso iyo qabri la dhisay oo aad dhulka la sinto

Abii Hayaaj Alsdii Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Cali Binu Abii Daalib ayaa igu dhahay: ma kuu diraa wuxuu Rasuulka Ilaahay scw ii diray? inaad dhaafin sanam oo aad burburiso iyo qabri la dhisay oo aad dhulka la sinto.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu scw wuxuu asxaabta u diri jiray inaysan ka tagin wax sanam ah, waana sawirka wax nool oo jurmi leh ama wax aan jurmi lahayn ee ay burburiyaan oo tirtiraan. Iyo inaysan dhaafin qabri kor loo dheereeyey ilaa ay dhulka la simaan, wixii laga dul dhisayna ay dumiyaan, ama ay ka dhigaan mid siman oo aan dhulka ka sarayn wax badan balse ka sareeya wax taako dhan.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5934>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

